

# Kiridhitka Xubinka u shaqaynaya Qoyska ee ku nool Minnesota: Ayaa kuu shaqaynaya!



Kiridhitka Xubin Qoyska u shaqeeya waxay cashuur dhaaf siiyaan shakhsiyaadka dakhligoodu ka hooseeyo heer cayiman. Kiridhitku waxay kaa dhimi kartaa canshuurta lagugu leeyahay waxayna ku siin kartaa canshuur celin.

## Miyaan u qalmaa Kiridhitka Xubinka u shaqaynaya Qoyska?

Guud ahaan, waa inaad buuxisaa shuruudahan si aad u dalbato Kiridhitka Xubinka u shaqaynaya Qoyska.

- Waxaad ku noolayd Minnesota sanadka oo dhan ama qayb ka mid ah sanadkii 2023, iyada oo laga dhaafo xubnaha milatariga.
- Inaadan ahayd qof ku tiirsan cid kale.
- Haddii aad xaas tahay oo adiga ama saygaaga/xaaskaaga aad tihiin shisheeye aan deganayn, xaaladdaada xerayntu waa inay noqotaa mid aad wadajir u xaraysataan.
- Haddii aadan lahayn carruur u qalanta, adiga iyo xaaskaaga/saygaaga waa inaad degganaydeen Mareykanka in ka badan kala bar 2023.

## Waa imisa?

Kiridhitka Xubinka u shaqaynaya Qoyskag waa 4% dakhligaaga aad shaqaysato ilaa uu gaadho \$350. Kiridhitka ayaa si tartiib tartiib ah u yaraanaya haddii dakhligaagu ka badan yahay \$35,000 kuwa si wadajir ah u xareynaya, ama in ka badan \$29,500 dadka sida shaqsiga u xaraysta.

Kiridhitka ayaa hoos u dhacaysa boqolkiiba lacagta aad sameyso ama wadarta dakhliga aad haysato ka dib marka wax kasta laga jaro, hadba mid ka badan. Haddii aad codsanayso Kiridhitka Caruurta Waaweyn ee U qalma marka lagu daro kiridhitkan, waxaa la dhimay 12% dakhligaaga. Haddii kale, waxaa la dhimay 9% dakhligaaga.

## Sideen u sheegan karaa?

Codso Kiridhitka Xubinka u shaqeeya Qoyska adoo isticmaalaya Jadwalka M1CWFC, *Kiridhitka Ilmaha iyo Kiridhitka Xubinka u shaqeeya Qoyska ee Minnesota*.

Waxa kale oo aad u qalmi kartaa diyaarinta cashuur celinta bilaashka ah! Tag [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) gali **free tax preparation** sanduuqa wax laga raadiyo si aad u heshid adeegyada diyaarinta canshuurta bilaashka ah ee kuu dhaw.

